


Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa

Ciise Wuxuu Bogsiiyey Nin Indha la'



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.


Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Bartimayos (bar-tim-ay-us) wuxuu ahaa nin indha la',
wuxuu ag fadhiyey jidka geeskiisa meel u u dhow
Yerexoo. Wuu dawarsan jiray. Dadka qalbiga
jilicsan waxay u ekaayeen inay siiyaan waxoogaa
lacag sanuud ah ama inyar oo cunto ah kolkay
meshaa marayaan. Bartimayos ma uusan shaqaysan



karin sabata oo ah
waxba ma uusan
arkayn. Wuu da-
warsan jirey un.

Maalin baa, waddada weyn maalin ay mashquulsanayd. Bartimayos wuxuu maqlay sawax iyo dhawaaga caged badan. Wax aan caadi ahayn baa dhacaya. Durbadiiba ninkii indhaha la'aa waxa uu ogaadaya waxaa wax ay yihiin.




3

Ciishii reer Naasaret baa magaalada joogay. Dadkiina waxay isugu sii ururuyeen inay arkaan Ciise, oo maqlaan Isaga.




4

"Ciise, ina Daa'uudow, ii naxariiso." Maxaa wacay inuu ugu qayliyo Bartimayos? Maxaa wacay inuu ku fikiro inuu isaga caawin karo Ciise? Lagayaabee inuu maqlay kuwa kale inuu bogsiiyey Ciise. Qaar wey dhaga la'aayeen, qaar way carrab la'aayeen, qaar curyaamiinnbay ahaayeen, qaarna wey indha la'aayeen, sidiisoo kale. "Ciise, Ina Daa'uudow, ii naxariiso," Bartimayos sidaasuu ku qayliyey. Codkiisana ku celceliyey si rajo leh.




5

Bartimayos hal shay buu hubay. Hadda haddii uusan caawimaad helin, isaga fursaddan oo kale ma heli doonin. Laga yabee inuusan mar kale soo mari lahayn jidkan Ciise.




6

Bartimayos wuxay ahayd inuu gaaro Ciise. Laakiin dadkii maysan dhaqaaqin "Sssshhh!" bay ku yidhaadeen. Waxayna ugu dageen inuu aamuso.




7

Laakiinse Bartimayos ma uusan aamusin. Wuu sii kordhiyey qayladii. Durbadiiba wuu istaagay! Maqlay! Wuxuuna amar ku bixiyey in loo keeno ninka indhaha la! "Kalsoonow," ayay ku yidhaahdeen dadkii. "Kac wuu kuu yeedhayaa."




8

Intuu maradiisii iska tuuray, ayuu kacayoo u yimid Ciise.



9

"Maxad dooneysaa inaan kuu sameeyo?" Ciise ayaa weyddiiyey. Sidee baad ugu jawaabi? Ma waxaad weydiisanaysaa lacag fara badan ama dhar cusub? Ma sidaa buu Bartimayos doonayay?



10


Maya, Indhoolihii Bartimayos ma uusan weyddiisan dahab iyo dhar cusub toona. Waaad taqaanaa

waxa uu doonayo isagu.




11

"Sayidow, inaan wax arko." Bartimayos wuxuu doonayay inuu wax arko! Inuu arko geedaha iyo shimbiraha iyo wax walboo quruxsan ee uu Ilaah abuuray. Wuxuu doonayay inuu wax arko si uu isu ilaaliyo/daryeelo isaga qudhiisa oo uusan baryootimin.



12

Deedna Ciise ayaa ku yidhi Bartimayos: "Hel aragaagii. Rumeysadkaaga ayaa ku bogsiiyey."



13

Mar unbuu aragiisii helay, oo raacay Ciise. Waxa keliya uu yidhina waxay ahayd, "Ilaahay waa cajiib"



14



Dadkii oo idil, markii
arkeen taa iyada ah,
Ilaah bay amaaneen.
Mar labaad, waxay
arkeen mucjisada
awoodda xoogga Wiilka
Ilaah, Ciise, uu araga
ugu keenay miskiinkii
indhaha la'aa ee
dawarsan jiray.

15

Ciise Wuxuu Bogsiiyey Nin Indha la'


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Markos 10, Luukos 18, Yooxanaa 9

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiya." Sabuurka 119:130

16



50



60

17

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax
ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa
raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo
uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi
dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo
diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta
korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo
noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo
aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa!
Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna
isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah:
Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad
noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad
u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan
markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan
adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado
sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

18